COA Centraal Orgaan opvang asielzoekers

Nidaamka hooyga xaruunta xafidista – iyo kormeerista (htl) Hoogeveen

Si nabadgelyada, nololwanaagga iyo maalmulista ee htl Hoogeveen loo xaqiijiyo, waxa ay COA adeegsaneysa nidaamka hooyga. Raacis la'aanta nidaamka hooyga waxy keeneysaa in nidaam xeereed lagu dul saaro, kaasi oo ay go'ynayaa shaqaalaha htl-ka.

1. Barta degaanka iyo nawaaxiga nolosha

1.1 COA waa hey'ad dejjin soo dhoweyn oo dhexdhexaad ah

COA waa hey'ad siyaasadda/diinta ka ah dhexdhexaad. Hawlgal siyaasadeed iyo diineed oo ku xadgudbaaya nawaaxiga nolosha shaqsiga ee dadka deggan halkaa lama oggola.

1.2 Barta degaanka ee shaqsiga kuu ah

Waxaa lagu siiyay bar degaan adiga kuu gaar ah. Waxa aad mas'uul ka tahay nadaafadda iyo si taxadder leh u isticmalka barta degaankaada iyo nawaaxiga nolosha iyo agabka kale oo isticmaal amaah ah laguu siiyay.

Wax ma ka beddeli kartid barta aad deggan tahay iyo agagaarkeeda iyo rugta dejjinta, iyo alaabta meeshaat allo. Xitaa keenista alaab aad adiga leedahay ama ku xirista dhar (sida daahyo, witrajo ama dhar derbiga lagu xiro) lama oggola dab ka nabad gelidda awgeed. Isbeddelada ama jejebinta aad adiga sameeysay waa laga saarayaa meesha ama la beddelayaa ama la kabayaa iyadoo kharashka adiga aad bixin doono.

Marka aad barta degaanka beddel awgiis ka tegeyso, waa in aad bartaada degaanka ka tagtaa iyada oo nadiif ah oo waxba ay ka kharribneyn, ayna ku jiraan qalabka COA oo dhammeystiran.
Ma la oggola in aad xayawaanka guryaha aad heysato iyo/ama rugta dejjinta soo geliso, ilaa maa in aad taasi u heshay oggolaasho qoraal ah ee madaxda rugta dejjinta.

1.3. U fasaxnaan gelitaan bartan degaan iyo beddel

Caadiyan shaqaalaha-htl waad u fasaxeysaa mar kasta in ay soo galaan bartaada degaan. Marka uu jiro baaritaan qasab ah, hawlgal dayactir- iyo dib u habeyn, amaba isbedel ay COA rabto in ay ku sameeyso barta degaanka, waa qasab in aad shaqaalaheeda-htl wakhti kasta siiso fursadaasi.

Waxaa dhici karta wakhtiga aad halkaa joogto in aay noqoto in aad u guurto bar kale iyo/ama in laguu keeno qof kale oo kula dega barta aad deggan tahay.

1.4. Waa in aad adiga deggan tahay

Barta aad adiga deggan tahay, waxa oo keli ah loogu tala galay adiga iyo dadka kula deggan waana in ay noqotaa halka aad ku sugan tahay muddada aad joogto dejjinta. Dad kale ma soo dejjin kartid halkaa.

1.5. Barta(baraha) degaan oo dadka ka dhexeeya

Baraha degaan oo dadka ka dhexeeya waxaa loogu tala galay adiga iyo dadka kale oo kula deggan. Qof waliba waxaa saaran mas'uuliyaada wadarta ee nadaafaddooda iyo in rugta oo dhan ay ahaato mid lagu noolaan karo, taas oo ay ka mid tahay baraha degaan oo dadka ka dhexeeya iyo hareeraha tooska ah.

1.6. Xirista rugta ee fiidnnimada

Marka ay tahay 22.00 saac miftaax ayaa lagu xiraayaa albaabka hore ee rugta ilaa iyo 8.00 saac oo aroornnimo. Hadaba waxaa laga sugayaa in aad 22.00 saac aad gudaha ku jirto!

2. Takoorka, baqdin gelinta iyo hujuumka
Xeerka guud ee COA waa in aad inta aad ku sugan tahay dejjinta COA aad sharciga iyo xeerarka bulshada Nederland aad ku dhaqntaa. Qodobka 1aad ee Dastuurka Nederland waa halka ugu muhiimsan oo ay COA ka amba qaadeyso. Halkaasi waxaa ku yaal in takoor xagga diinta, waxaa aad nolosha ka aaminsan tahay, waxa aad siyaasadda ka raacsan tahay, qomiyadda, jinsiga ama wax kaloo kasta in aan la oggoleyn.

Nooc kasta (oo ku hagis) hujuum iyo weerar ee ku abbaran dad, tusaale ahaan isagoo ah takooris, ku hanjabis weerar hooyga gudihiis, waa mar kasta ka mamnuuc Nederland iyo rugaha dejjinta ee COA. Marka aad adiga hujuumto ama aad weerar ku qaado shaqaale COA waxaa xigaaya in ciqaabta ay noqoto mid la sii kordhiyo.

Falalka xeerka ciqaabta ama xitaa marka ay malo oo keli ah jirto, waxaa mar kasta la war gelinaayaa boliiska. Marka aad adiga noqoto dhibane hujuum ama weerar, waxa ay mar kasta COA kugula talineeysaa in aad qofka ku weeraray aad ashtako (boliiska) ka geeyso.

3.Booqashada
Si aad u qaabisho dadka ku soo booqanaaya oo ka yimaada mee ka baxsan rugta dejjinta, waa in aad oggolaashada COA u heysataa. Wakhtiyada ay kula joogaayaan iyo shuruudaha ku xiran waa in aad COA isla afgarataan.

Waa kugu qasab in dadka ku soo booqanaaya aad qaabiladda hore ka soo doonto.

Adiga ayaa qeyb ahaan mas'uul ka ah in dadka ku soo booqday ay u hoggaansamaan xeerarka.

Rugta-htl kasta waxaa yaal 'Nidaamka Booqashada" oo aad akhrisan karto. Dadka ku soo booqanaaya waa in ay u hooggaansamaan nidaamkaa booqashada.

4. Maandooriye, qamri, hub, ganacsi reeban
Heysashada sharci darrada ah, isticmaalka iyo/ama ka ganacsiga maandooriyayaasha, qaadka iyo hubka ama hawlgal ganacsi kasta oo kale oo sharci darro ah waa mamnuuc. Saqraannimo oo goobaha dadweynaha ma la oggola.

5. Shanqar la dhibsado
Waad ka taxaddareysaa dadka kula deggan iyo kuwa agagaarkada deggan mana sameyneysid wax dhiba ama cakkira wakhti kasta. Inta u dhexeysa 22.00saac ilaa 8.00 waa in ay degganaan jirto.

6. Jebinta xogta shaqsiga
Muhimad weyn ayeey nala leedahay xogta shaqsiga oo dadka degganayaasha iyo shaqaalaha gudaha COA. Taasii awgeed ayaa xeerar loo dejjiyay qaadista taswiirta, filimada- iyo qabashada codadka. Xeerarkaas waa kuwa quseeya rugaha oo dhan iyo degganayaasha iyo dadka booqashada ku yimaad.

Waa mamnuuc in oggolaasho la'aan laga qaado taswiir ama qabasho cod gudaha xadadka rugta-htl ha ahaado dad kula degga, shaqaalaha, dadka booqashada u jooga ama dadka ook u sugan rugta.

Isticmaalka kaamera qarsoodi ah si cad ayaa loo mamnuucay. In la soo shaaciyo amaba dad loo qeeybiyo duubis ama qabasho oo aan oggolasho lahayn dadka laga qaaday waa reeban tahay.

7. Ka qeygalkka brograamyada

Waxaa in aad ka qeyb qaadato qeybaha broograamka maalinta ee lagula sameeyay. Ka qeyb gelis la'aanta qeybaha qasabka ah ee broograamka waxay si xun u saameyneysaa fursaddaada dib ugu noqosho ee dejjinta caadiga ah.

8. Wadahadalka qasabka ah
Wadahadalada qorsheeysan oo aad la leedahay hagahaada iyo shaqaalaha IND iyo DT&V ma aha kuwo haaddii aad doonto ah waa in aad ka soo xaadirtaa.

9. Baaritaan TBC oo qasab ah
Haddii aad ka timid waddan ay tbc (qaaxada) ku badan tahay waxaa kugu qasab ah in aad wada shaqeyn la timaado ee baaritaanka qaaxada (TBC) marka loo baahdana ka daweynta soo raaci karta.

10. Is xaadirinta qasabka ah iyo diwaangelinta guri ku jirista
Waxaa htl ka jira is xaadirin qasab ah ee AVIM oo uusbuucle ah iyo diwaangelinta guri ku jirista oo maalin kasta ah (maalintiiba laba jeer) ee COA. Waxaa kugu qasab ah in aad iska xaadiriso wakhtiga ay COA kuu qabatay barta ay kuu tilmaameen. Warbixin gaar ah oo is xaadirinta qasabka ah iyo diiwaangelinta guri ku jirista ayaad ka heleysaa shaqaalaha xaruunta. Ma leedahay sabab wanaagsan aadan ku fulin karin is xaadirinta qasabka ah iyo diwaangelinta guri ku jirista? Waa in aad taasi hore ula socodsiisaa shaqaalaha-COA aadna codsataa ka dul qaadis. Waa in aad dokumenti caddeyn ah ku qeexdaa sababa asalka u ah in aadan xanniban tahay.

11.Xurnnimada dhaqdhaqaaqa
Dejjinta htl-ka waxaa keenay saarista jaango'yn xeerka 56 (ex. Vreemdelingenwet 2000) kaasi oo qeexaayo halka aad adiga ka tegi karto gudaha xadadka dowladda hoose ee ay htl-ka ku taal. Ma aha in aad tagto qeybaha dowladda hoose oo jaango'ynta xeer uu kaa reebay. Hadii awodda/boliiska nawaaxiga ay kaa helaan qeyb aan laguu oggoleyn oo dowladda hoose ka mid ah isla markaa ayeey ku qabanayaan waxaan taa ku soo xigo ganaaxyo.

12. Agab isticmaal oo amaah ah
Agabka qaar ka mid ah waxa aad ku heli kartaa isticmaal oo amaah ah. Kaasi wa in aad shaqaalaha-htl-ka hore uga codstaa oggolaasho. Agabka laguu siiyay isticmaal oo amah ah, waa in aad wakhtiga lagu ballamay dib ugu soo celisaa.

13. Qoraalka tilmaan bixinta dabka
Qorallada tilmaan bixin ee soo socda waa in had iyo jeer la raacaa:
- Lama oggola in sigaar lagu cabbo gudaha barta degaanka iyo dhismayaasha kale.
- Dab shidan (shumac, cuud, feynuusta gaaska, iwm.) ma la oggola, marka laga reebo isticmaalka makiinadaha wax lagu karsado ee kushiinka.
- Digsiyada inta wax la karsanaayo loogama tegi karo makiinadda wax lagu karsado oo shidan.

In lagu sameeyo beddelaad ama la dhaawaco agabka ka nabadgelista dabka si adag ayaa loo mamnuucay sababo nabadgelyo awgood. Waxaa halkaan lagu mamnuucay :
- Fujjinta ama kala dhigista (kala furista) digniinta dabka;
- Kala furfurista ama sii deynta albaab xiraha ama in aad furitaan ku xajjisaan albaabada dabka uusan soo dhaafin oo caadiyan iskood u soo xirma (tusaale ahaan taako gelin).

Isticmaalka agab koronto loo ageegsado oo nabad gelyadiisa sugneyn iyo xitaa agab koronto oo nabad gelyadooda dabka ay sugnayn lama oggola. Taasi waxaa qiimeynaaya shaqaalaha-htl ee rugta.

Xannibaadda jidadka baxsiga, tusaale ahaan iyadoo la dhigo gaariga carruurta ama baaskiillada dhismaha la deggan yahay, ama shididda digaha dabka iyada oo aan loo baahneyn, lama oggola.

Ha ku keydsan abidkaa bansiin, alkool ama curiye kale oo si fudud dabka u qabsado barta aad deggan tahay.Ka nadiifi isticmaalka ka hor qashinkii hore filterka qallajisada dharka. Qallajiso qashin leh si fudud ayaa dab u qabsadaa!Marka digniinta dabka uu dhawaaqo, waa in aad si toos ah dhismaha uga baxdaa aad bannanka ku sugtaa tilmaan bixinta shaqaalaha.

14. Mas'uuliyadda
COA mas'uul kama aha haddii milkidaada uu dhaawac gaaro ama ay lunto, xitaa hadii dhaawacaas ay geysteen dad kula deggan ama kuwa kaleba.

Adiga ayaa si buuxda mas'uul uga ah waxa aad dhaawac u geysato oo- ah barta aad deggan tahay iyo/ama agabka dhan oo COA iyo isticmaalkooda taxadder la'aan ah. Kharashka lagu dayac tiro ama lagu beddelo adiga ayaa laguugu soo dallacaayaa.

Marka aan la caddeyn karin midkee degganayaasha ka mid ah, ee bar degganaasho gaar ah, ayaa dhaawaca geeystay, amaba dayactirka nawaaxigiisisa nololeed ka gaabiyay, waxaa mid kasta oo ka mid ah degganayaashaa (iskiis) u qaadi doonaa mas'uuliyadda dhaawacaas. Taasi waxa ay quseeysaa xeerarka hooyga oo lagu dhaqo barta degaanka.

Marka la waayo ama la dhaawaco milki COA ay leedahay waxaa ashtako la geeynayaa boliiska.

15. Raacista hagista shaqaalaha-htl
Waxa aad wakhti kasta ku qasban tahay raacista hagista shaqaalaha-htl iyo in aad xeerarka hooyga fuliso.

16. Nidaamka ashtako keenista
Haddii ashtako jirto waxaa la raacayaa geedisocodka ashtakada COA. Taasi waxa aad ka heli kartaa qaabilaadda hore.